## Gundhig ballaaran oo go’aan oo looga gaaro tallaallada fayras-fektarka

**[virusvektor-vaksiner]**

**Waxay dawladdu doonaysaa in ay go’aan kama dambays ah ka gaarto isticmaalka tallaallada covid-19 ee AstraZeneca iyo Janssen. Waxaa la dejinayaa guddi khuburo ah oo isugu jira qaar dalka ka yimid iyo qaar ajnebi ah, kuwaas oo darsi doona waxyeellada ka imaan karta haddii tallaaladan la isticmaalo oo lagu daro barnaamijka tallaalka iyo haddii aan lagu darin.**

Machadka caafimaadka dadweynuhu [FHI] wuxuu ku talinayaa in tallaalka AstraZeneca si rasmi ah looga saaro barnaamijka tallaalka, waxyeellada dhifta ah laakiin halista weyn leh awgeed. FHI wuxuu taas u eegay xaaladda faafidda cudurka ee Norway.

– Dadka maaddada aqoonta u leh ee FHI si buuxda oo xooggan ayay arrinta u qiimeeyeen. FHI iyo dadka norwiijiga ah ee maaddada aqoonta u leh oo kaashanaya jaalkooda reer Danmark goor hore ayay ogaadeen waxyeellada, waxayna baareen xiriirka ka dhexeeya waxyeellada iyo tallaalka. Kalsooni ayay abuuraysaa in mas’uuliyiintu garawsadaan khatarta ay leedahay waxyeellada dhifta ah, laakiin halista ah – iyo in Norway leedahay nidaam xaaladahan lagu ogaado. Waxyeellada dhifta ah ee FHI ku keenay in ay AstraZeneca hakiso ayaa ah mid ay aad ugu badan tahay in uu tallaalku keenay. Arrintaan ayaa hadda ah mid dunidu isku raacsan tahay, ayuu yiri Bent Høie oo ah wasiirka caafimaadka- iyo daryeelka.

Tallaalkii Janssen shirkaddii soo saartay ayaa si ku meelgaar ah u hakisay kaddib markii lagu arkay waxyeello la mid ah midda dhifta ah, laakiin halista ah, ee tallaalka AstraZeneca.

**Saamayn weyn**

– Sida FHI ayaan aniguba uga welwelsanahay waxyeellada halista ah. Laakiin waxaan sidaa si la mid ah uga welwelsanahay dhibka dadka iyo bulshada norwiijiga ka soo gaari kara tallaalka iyo dib-u-furidda dalka oo dib loo dhigo. Wuxuu guddiga koroonuhu shalay caddeeyay in ay carruurta iyo dhallinyaradu culays weyn kala kulmeen cudurkaan safmarka ah. Looma baahna in uu culayskaas sabab la’aan u sii saarnaado. Haddii aan tallaalladaan si rasmi ah u joojinno, waxaan markaa khatar ugu jirnaa in aan gaari weyno hadafkii ahaa xagaaga gudihiisa in la tallaalo dhammaan dadka wixii 18 sano ka weyn. Markaa waxaa dhici karta in ay weli sii jiraan tillaabooyinkii iyo in uu cudurki mar kale dillaaci karo, ayuu yiri Høie.

Dunida oo dhan dadka maaddada aqoonta u leh ayaa ku hawllan sidii ay ku heli lahaayeen cilladda tallaallada noocayada ku salaysan fayrus kale oo la beddelay (fayras-fektarka).

- Dawladdu waxay qabtaa in aan la hayn sabab fiican oo ku filan in tallaalka AstraZeneca si kama danbays ah looga saaro barnaamijka tallaalka ee norwiijiga. Haddii aan si kama danabys ah u diidno tallaalka AstraZeneca, waxay taasi saamayn kartaa fursadda aan kaga fiirsan karno in aan isticmaalno tallaalka Janssen, maxaa yeelay labadooda isku si ayaa loo sameeyay. Waa in aan dabacsanaan muujinnaa oo sugnaa cilmibaarista caalamiga ah, oo ku tala galnaa in ay taasi keeni karto in tallaalladan la isticmaali karo, ayuu yiri Høie.

Dhanka kale, waxay dawladdu u diyaargaroobaysaa in barnaamijka tallaalku halkiisa ka sii socon karo ayada oo aysan ku jirin tallaallada AstraZeneca iyo Janssen.

- FHI waxay hadda eegaysaa in la dheerayn karo muddada u dhexaysa goojada koowaad iyo tan labaad ee tallaallada Moderna iyo Pfizer oo loo dhexaysiin karo 12 toddobaad meesha ay hadda u dhexayso 6 toddobaad. Dadka lagu duray goojada koowaad si fiican ayay uga difaacan yihiin covid-19. Haddii la dheerayn karo muddada labada goojo u dhexaysa, dad badan ayaan degdeg u tallaalaynaa, ayuu yiri Høie.

**Qiimayn ballaaran**
FHI markii ay qiimaynaysay khatarta isticmaalka tallaalka AstraZeneca ee Norway waxay soo qaadatay tirada dadka Norway u dhimatay covid-19 iyo tirada dadka Norway ku dhintay ee la dhihi karo waxay sababsadeen waxyeello halis ah oo tallaalku keenay. Waxaa hadda socda dadaal badan oo heer caalami ah oo la doonayo in wax badan looga ogaado khatarta loogu jiro waxyeellada halista ah.

Sidaas darteed waxay dawladdu rabtaa qiimayn ballaaran oo wax ka sheegaysa waxyaalihii ay dalalka kale ka ogaadee tallaalka, iyo culayska ay dib u dhigistiisu u soo jiidayso dadka iyo bulshada guud ahaan.

**Shaqada guddiga**
Guddiga khuburadu wuxuu si guud u qiimaynayaa khatarta shakhsiga iyo bulshada soo gaaraysa haddii la isticmaalo tallaallada fayras-fektarka. Wuxuu guddigu qiimayn ku samayn doonaa cilmibaarista caalamiga ah ee lagu sameeyay waxyeellada iyo khatarta. Wuxuu guddigu qiimayn doonaa in loo isticmaali karo da' gaar ah, wuxuu kale oo eegayaa in ay jiraan tillaabooyin looga hortagi karo waxyeellada iyo sidii lagu heli lahaa daaweyn degdeg ah.

Waxay sidoo kale qiimayn ku samaynayaan kalsoonida lagu qabo barnaamijka tallaalka iyo tallaallada kala duwan kuwa ay dadku doonayaan. Waxay qiimayn ku samaynayaan dadka kuwa doonaya in degdeg loo tallaalo in ay tallaaladaan si ikhtiyaari ah u dooran karaan, haddii ay EMA isticmaalkooda oggolaato.

Waxaa sidoo kale guddiga laga codsanayaa in ay qiimeeyaan waxyeellada bulsho ee ka imaanaysa haddii la joojiyo isticmaalka tallaalladaan. Sidee ayay u saamaynaysaa inta qof ee uu ku dhacayo cudurka covid-19 iyo inta u dhimanaysa, weliba dadka da'da yar – iyo macluumaadka dhibka gadaal ka soo gaara qofka uu ku dhacay covid-19.

Asaga oo hawshiisa intaas ku salaynaya ayuu guddigu dawladda kala talinayaa sida Norway looga isticmaalayo tallaallada fayras-fektarka ee ay EMA oggolaatay ee Yurubta kale lagula taliyay in ay isticmaalaan. Waxaa loo qabtay 10-ka maajo.

**Xubnaha guddiga khuburada**
Guddiga khuburada waxaa madax u ah Lars Vorland. Vorland waa dhakhtar, wuxuuna haystaa dhoktarayd uu ku qaatay cilmiga daawada maykrobayoolajiga. Wuxuu agaasime ka

ahaan jiray qaybta ka hortagga cudurrada faafa ee FHI, agaasime guud ka ahaa Helse Nord, wuxuu madax ka ahaan jiray gole la yiraahdo Golaha Hirgelinta Teknoloojiyada Cusub.

Xubnaha kale ee guddiga:
Gunnveig Grødeland, cilmibaare Jaamacadda Oslo
Gunnar Bovim, dhakhtar, la-taliye ka ah NTNU
Anne Kjersti Befring, sharci-yaqaan, macallin ka ah Jaamacadda Oslo
Baard-Christian Schem, agaasime, Helse Vest
Steinar Krokstad, HUNT, barafasoor NTNU,
Ingrid Hjort, cilmibaare, BI
Jon Michael Gran, tirakoob-yaqaan, macallin ka ah Jaamacadda Oslo
Ingvild Sørvoll, dhakhtar takhasus leh, Isbataalka Jaamacadda Waqooyiga Norway
Kathrine Kristoffersen, dhaktar degmo, Tromsø
Linda Nøstbakken, agaasime cilmibaaris, Xarunta dhexe ee qorshaynta qaranka
Marie-Paule Kieny, agaasime cilmibaaris, INSERM, Faransiiska
John Edmunds, barafasoor, London School of Hygiene and Tropical Medicine